

## OGAYSIIS

### **Shirkadaha Gudaha ee Daneynaya diiwaangelinta Astaanta Internetka .SO**

Astaanta Internetka ee dalkeena (.so) waxaa lagu soo wareejiyay bishii Maarso 2018 Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka sida uu qabo Qod. 54(2) ee xeerka Isgaarsiinta Qaranka. Tan iyo markaas waxaa lagu hawlanaa in wax laga beddelo nidaamkii ay u shaqeyn jirtay, loona diyaariyo hannaan cusub oo la jaan-qaadi kara adduunka.

Dhinacyada mudnaanta la siiyay waxaa ka mid ah in la xalliyo arrimihii farsamada (technical issues) maadaama ay fure u yihiin horumarka lala damacsan yahay astaanta. Waxaa dhowaan soo dhammaaday in laga soo guuro shirkaddii hore ee dhinaca farsamada ka caawin jirtay astaanta ee (Cloud Registry), waxaana loo soo guuray barnaamijka CoCCa oo ay adeegsadaan astaamaha dalalka badan, sida Kenya, Rwanda, Kuwait, Sudan, Nigeria, iyo qaar kale.

Mid ka mid ah caqabadihii jiray waxa ay ahayd in helitaanka astaanta ee dalka gudahiisa ay aad u koobneyd maadaama shirkado tiro yar oo dalka ka shaqeeya ay diiwaangelin sameyn jireen; taas oo ka hor imaanaysay ujeeddadii laga lahaa astaanta oo ah inay noqoto mid uu heli karo qof, shirkad, jaamacad, dugsi, iyo xafiis kasta oo dalka ka shaqeeya. Shirkadaha gudaha waxay fursad u siin doonaan dadweynaha inay ku helaan astaanta qiime ka jaban kan shirkadaha caalamiga ah.

Haddaba waxaa la ogeysiinayaa dhammaan shirkadaha ka shaqeeya tiknolojiyadda dalka, gaar ahaan diiwaangelinta iyo naqshadeynta mareegaha internetka, in SONIC oo maamusha howlaha farsamo ee astaanta, ay u hayso fursad ah in ay noqon karaan diiwaangeliye gudaha dalka ah (local Registrar)

Haddaba shirkadaha daneynaya waxaa laga doonayaa in ay soo diraan qoraallo ay ku muujinayaan in ay daneynayaan inay noqdaan diiwaangeliyayaasha gudaha ee astaanta, iyaga oo soo diraya:-

- Codsii noqosho diiwaangeliye gudaha ah oo ku socda SONIC
- Shahaadada diiwaangelinta shirkadda
- Faahfaahin kooban ee shirkadda (Profile)
- Taariikh nololeedka shaqo ee farsamayaqaannada Shirkadda (CVs)
- Inay leedahay website leh astaanta dalka (.so) oo shaqeynaya, emailkana laga soo diro.
- Cinwaanka Xarunta/Xarumaha Shirkadda

**Waxaa si gaar ah loo soo dhoweynayaa shirkadaha ka shaqeeya ee xafiisyada ku leh gobollada dalka si adeeggan loo gaarsiiyo dalka oo dhan.**

Waxa aan ku soo diri kartaa emailka [registrars@sonic.so](mailto:registrars@sonic.so) ugu dambeyn 10 Disember 2018

Waxaa lala soo xiriiri doonaa oo kaliya shirkadaha buuxiyey Shuruudaha, si ay ugu gudbaan wareega labaad ee qiimeynta.